

## **Ardayda Gaarka ah ee Cedar Grove High ayaa ku Hormaray Sneaker Ball Gala Extravaganza**

Dugsiga Sare Cedar Grove waxay sameeyeen Isbuuc Carruurta Gaarka ah oo gaar dheeraad ah u ah kooxda ardayda gaar ah. Dugsiga wuxuu la kaashaday Best Buddies, International iyo *Sneaker Ball Gala Extravaganza* ee la kafaala qaaday Abriil 16 si u aruuriyo lacagaha barnaamijka.

Best Buddies ayaa ka caawiya ardayda curyaannimada garaadka qaba inay helaan madaxbanaani, isu doodis, xirfadaha xiriirka, iyo saaxiibtimu macno leh iyadoo la hubinayo shaqooyin guul ah oo ay dareemaan in laga qiimeeyo bulshada.

Marwo Tonya Bush, oo ah macalinka waxbarashada gaarka ah ee Cedar Grove High, ayaa ku kafaala qaada dugsiga cutubka Best Buddies. Waxay aragtay saameynta ugu fiican ee barnaamijkaan ee ardaydeeda iyadoo loo marayo hindisaha saaxiibtinimadaqof-ku-qof. Hindisahaan wuxuu dhisaa saaxiibtinimada u dhaxeysa shaqsiyaadka qaba iyo kuwa aan qabin curyaannimada garaadka iyo hormarka (IDD), iyagoo siinayo isdhexgalka bulshada oo xoojinayo tayada nolosha iyo heerka ka mid noqoshada dadka inta badan la gooniyeeyay oo laga saaray.

“Ardayda waxbarashadeena guud waxay ku qaataan waqtii ay kaga baxaan maalintooda mashquulka dugsiga si ay aadaan fasalka lamaanahooda saaxiibtinimada si ay u soo salaamaan iyo, mararka qaar, ay kula qaataan waqtigooda fasaxa qadada howlaha,” waxaa ytiri Gabar Bush. “Tusinta qof inaad daryeeleysid ay keento isbadelo badan oo kale duwan.”

Lacagaha laga helo Sneaker Ball waxaa loo isticmaalayaa in lagu bixiyo waxbarashada bulshada ku saleysan iyo howlaha ardayda. Charles Gerth ayaa la dheelay asxaabtiisa isku fasalka oo wuxuu u mahadceliyay macalinkiisa, Gabar Bush, taasoo la diyaarinayo dhacdada.

“Aad ayaad u mahadsantihiin dhammaan waxyaabaha wanaagsan iyo waxyaalahi fiican ee aad qabataan,” waxaa yiri Charles. “Waqtii fiican ayaan ku qaadaneynaa, inaan raaxeysano nafsadeena. Waa maalin wanaagsan, maalin qurxoon.”

Gabar Bush waxay rajeyneysaa in Best Buddies ay ka caawinayaan ardayda naafada ah iyo kuwa aan naafada aheyn saaxibtinimo waarta.

“Ardaydeena waqtigaan si fiican uma fahmaan in dhammaan ardayda isku mid yihiin, laakiin ay si ka duwan u bartaan,” ayay tiri. Ma qabto dhacdo bil walba, laakiin sidoo kale waxaan wax wabaraa xubnaheyga Best Buddy. Lataliye ahaan, waa muhiim in ardayda waxbarashada guud ay garanayaan waxa naafonimada garaadka loola jeedo.”

Wixii warbixin dheeraad ah oo ku saabsan Best Buddies, fiiri: [www.bestbuddies.org](http://www.bestbuddies.org)